Updated on 12/5/2025

# HAGAHA DIYAARGAROWGA QOYSKA



## Waa maxay Diyaargarowga Qoyska?

- Diyaargarowga Qoyska waxay ku saabsan tahay in wakhti horeba aad dejisato qorshahaaga ku aaddan dhanka sharciga, maaliyadda, iyo bixinta daryeelka. Tani, waxay qofka uu sahleysaa haddii xabsiga la dhigo amaba la musaafuriyo, in carruurtiisa, kuwa uu jecel yahay, iyo arrimihiisa muhiimka ah in la ilaaliyo.

## Waxa ay Muhiim uu tahay?

- Haddii aysan jirin wax diyaargarow ah, qoysasku waxay wajahaayan khatarta aadka uu sarreeyso ee ah in la carqaladeeyo— carruurta ayaa waxaa laga yaabaa in iyaga iyo waalidiintooda la kala sooco, lacagaha uu kaydsan ayaa laga yaabaa qofka in uu heli waayo, amaba waxaa laga yaabaa in kuwa aad jeceshahay in ay ku adkaato inay ka gudbaan nidaamka. Inkastoo aysan jirin wax diyaargarow ah oo meesha ka saari kara khatartan, Diyaargarowga Qoyska ayaa waxay kuwa aad jeceshahay siinaysa macluumaadka muhiimka ah iyo agabyada ee ay sida wanaagsan isugu ilaalin karaan.

## Ogow Xuquuqdaada

- Inaad fahanto xuquuqdaada iyo sida iyo marka aad adeegsan karto waxay ka caawinaysa in aad ka baaqsato in lagu xiro. Halkaan wax badan kaga ogow.

Hagaha Barashada Xuquuqdaada

## Heel Qofka(dadka) aad sida Degdega ah ula xiriiri karto

- Qofka sida degdega ah aad ula xiriiri karto waa in uu ahaada qof wayn oo aad ku kalsoon tahay kaas oo aad ogtahay in uu si degdeg ah oo mas'uulnimo leh wax uga qaban karo haddii ay wax kugu dhacaan. Waxaa muhiim ah inaad tixgeliso heerka socdaal ee qofka aad la xiriireyso. Haddii iyagu sidoo kale ay halis ugu jiraan in la xiro, waxaa laga yaabaa in uusan ahayn qofka ku habboon ee aad isku halayn karto. Xusuusnow, waxaad yeelan kartaa wax ka badan hal qof oo aad si degdeg ah aad ula xiriiri karto, taas oo ku siineysa fursadda aad ku kala dooran karto iyo difaac dheeraad ah waa haddii aad mid kamid aad heli weydo marka aad uu baahato. Hubi in qofka aad sida degdega ah aad kula xiriiri karto uu yahay mid telefoonka hor ka qaban karo. Waa inay heli karaan A#, taarikhda aad dhalatay, iyo wadanka aad ka soo jeedo si ay kaga eegan nidaamka laga eego dadka la xiray. Waxaa halkaan hoose ku xusan qaar kamid ah tusaalooyinka mas'uuliyadaha saaran qofka sida degdega ah aad kula xiriiri karto:
  - In uu isku keeno dukumeentiyadaada muhiimka ah.
  - In uu wargeliyo xubnaha katirsan qoyskaaga.
  - In uu la xiriiro qareenka dhanka socdaalka islamarkaasina dukumeentiyadaada si lagu difaaco.
  - In uu wargeliyo qofka aad uu shaqeeyso.
  - In uu daryeelo xayawaanada aad guriga ku dhaqato iyo in uu wax ka qabto waxyaabaha gurigaaga looga baahan yahay inta aad maqan tahay.
  - In uu daryeelo carruurtaada.
  - In uu ku daryeelo dhaqaalahaaga.



Waa maxay A#-ga?

## Heel Qof ku Daryeelo Carruurtaada

- Waxaa nasiib darro ah, ICE waxay ku duushaa oo ay xirtaa iyadoo inta badan kala soocdo waalidiinta iyo carruurtooda. Haddii aad soo gudbiso magaca qofka daryeelaha ah ka hor wakhtiga waxay uu sahleysaa carruurtaada inay helaan fursad wanaagsan oo ay ku heli karaan daryeel xitaa haddii la idin kala sooco. Qaababka ugu fudud ee ku oggolaanayaa inaad soo gudbiso magaca qofka daryeelaha ah ayaa ah Foomka Waalidka ee Magacaabista (OCFS-4940), kaas oo uu oggolanayaa in qofka aad adiga rabto uu ka shaqeeyo baahiyahaaga aas-aasiga ah ee waxbarasho iyo caafimaadka, sida in uu ka soo qaado canuga dugsiga amaba in uu geeyo ballanka uu la leeyahay dhakhtarka. Waalidiinta waxay weli sii lahaanaayan dhamaan xuquuqdooda marka ay saxiixaan foomkan.

## Kor uu Eeg Kiiskaaga

- Ka baro sida kor loogu eego kiiskaaga nidaamka maxkamadda. Booqo acis.eoir.justice.gov amaba wac (800) 898-7180 oo uu sheeg A#-gaaga iyo wadanka aad asal ahaan ka soo jeedo si aad uu xaqiijiso taarikhda xigta ee aad maxkamadda ka soo hor muuqanayso iyo in lagugu xukumay in dalka laga saaro.

Waa maxay xukunka in dalka laga saaro?

*Hagahan waxaa loogu talagalay oo keliya macluumaad. Ma ahan talo dhanka sharciga ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada, xaalka qoyskaaga, amaba kiiskaaga socdaalka, waa inaad la hadashaa qareen dhanka socdaalka amaba qoyska ee aqoon uu leh, amaba wakiil sharci uu haysta arrimahan.*

NYIC

New York State Department of State Office for New Americans

New Americans Hotline:
1-800-566-7636
Monday – Friday, 9 AM–8 PM EST
MULTI-LINGUAL AND CONFIDENTIAL

# HAGAHA DIYAARGAROWGA QOYSKA

## Isku aadiso Dukumeentiyadaada




- Ka baxso dhowr nuqul dhamaan dukumeentiyadaada muhiimka ah. Sameeyso nuqullo dhijitaal ah ee dukumeentiyadan iyo sidoo kale (waxaad sawirro ka qaadan kartaa dukumeentiyada muhiimka ah adigoo adeegsanayaa telefoonkaaga).
- Ku kaydso dukumeentiyada asalka ah iyo ugu yaraan hal nuqul ee kuwa aad soo bixisay meel bad-qabta.
- Ka sameeyso nuqullo dukumeentiyada carruurtaada oo ka dhig kuwo la heli karo, tusaale, ku rid hal meel gaar ahaan boorsada uu canuga ku qaato dhabarka.
- Haddii aad u baahan tahay inaad tusto dukumeenti fulinta sharciga, iska ilaali inaad dhiibto taleefankaaga, kaas oo waxa ku jiri kara macluumaad shakhsi oo ka badan inta aad doonayso inaad wadaagto.

## Raadso Dukumeentiyada lagu Safro ee Wadankaaga Hooyo

- Haddii ay tahay tallaabo bad-qab leh suurtagalna ah, waxaa laga yaabaa inaad uu baahan tahay inaad codsato baasaboor amaba dukumeenti aad ku safri karto adiga iyo carruurtaada. Tani waxay ka caawin kartaa dhanka safarka waxaana laga yaabaa inay ka hortagto inaad la kulanto dhibaatooyin haddii aad uu baahato inaad isaga tagto Maraykanka. Balse dadka qaar, sida kuwa magangalyo-doonka ah, helida amaba dib uu soo cusboonaysiinta baasaboorka ee wadankooda hooyo ayaa noqon kartaa mid aad halis uu ah. La hadal sharci-yaqaan lagu kalsoonaan karo ka hor inta aaddan tallaabadan qaadin. Si wax badan aad uga ogaato qaabka lagu heli karo dukumeentiga aad ku safri karto ee wadankaaga hooyo, waxaad uu baahan doontaa inaad la xiriirto qunsulkaaga amaba booqo mareegtooda.

## Uu suurtageli inay Heelaan Lacagta

- Dhigo lacagaha aad kaydso akoon bangi halka aad ku tiirsanaan lahayd lacag caddaan ah. Marka lagu xiro, waxaad uu baahan kartaa inaad sameeyso wicitaan amaba aad soo iibsato waxyaabaha aad uu baahan tahay.
- Hubi in akoonkaaga bangi uu ku xiran yahay kaarka wax lagu iibsan karo si aad adiga — amaba qof kale aad ku kalsoon tahay — uu ula baxo lacagaha si degdeg ah haddii loo baahdo, xitaa haddii aad joogto dalka dibediisa.
- Sameeyso qaab dhanka intarneetka aad ugaga isticmaali kartid bangigaaga wakhti horeba. Sidaasi, haddii aad sameeyso waxaad heli kartaa lacagahaaga adigoo jooga meel aan ahayn bangiga.
- Waxaa sidoo kale laga yaabaa inaad ku darsato qof aad ku kalsoon tahay akoonkaaga sida aad uu wada maaraysaan isla akoonkaas, si qoyskaaga ay uu helaan lacagaha haddii adiga aaddan heli karin.
- Kaydso lacagaha mar kaste oo ay suurtagal tahay— xitaa haddii ay noqoto lacago yar oo degdeg ah taas oo keeni karta

## Ka fikir inaad Diyaarsato Foomamkan soo Socda

- Macluumaadka Muhiimka ah ee Kugu saabsan
- Macluumaadka Muhiimka ah ee ku saabsan Canugaaga
- Oggolaanshaha inay Qaatan Lacagaha
- Oggolaanshaha in Canugaaga uu Safro
- Qof wakhti kaste la heli karo oo mas'uul ka noqon karo canuga
- Foomka Waalidka ee Magacaabista
- Codsiga Baasaboorka Maraykanka ee Carruurta



Si wax badan oo ku saabsan foomamkan aad uu ogaato, eeg Foomamka Hagaha Diyaargarowga Qoyska.

## Xusuusinta Nootayada

- Foomamka qaar waxay uu baahan yihiin nootaayo. Gobolkan New York, lacagaha ku baxa nootaayada ayaa ah $2 halkii saxiix. Qoysaska waxay adeegyada nootaayada ka heli karaan makaatiibta dadwayne, bangiyada, qaar kamid ah xafiisyada UPS amaba FedEx, iyo Walgreens. Waxaan ku boorinaynaa qoysaska inay ka digtoonaadan in la khiyaamo: nootayada Maraykanka ma ahan qareenno mana ku siin karaan talo ku saabsan dhanka socdaalka.

*Hagahan waxaa loogu talagalay oo keliya macluumaad. Ma ahan talo dhanka sharciga ah. Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan xuquuqdaada, xaalka qoyskaaga, amaba kiiskaaga socdaalka, waa inaad la hadashaa qareen dhanka socdaalka amaba qoyska ee aqoon uu leh, amaba wakil sharci uu haysta.*